


Marka aad cunto Xalaal ah ka dalbaneysa Isbitaalka QEII



Waxaan ku siin karnaa cunto Xalaal ah.

Kala hadal kalkaaliso caafimaad ama shaqaale nafaqo wixii ku saabsan cuntadaada Xalaasha ah.

Tani waxay kaa caawineysaa inaad dalbato cuntooyinka saxda ah.

Waxaad dalban kartaa laba nooc oo cunto Xalaal ah

1. Cuntada Xalaasha ah ee la xaqiijiyay



Cuntooyinkan waxaa:

- Lagu sameeyay oo lagu soo kariyey **meel ka baxsan isbitaalka Fiiro gaar ah: Jikada QEII ma aha mid shahaado Xalaal ah haysata**
- Inta aan la keenin ka hor waa inay xiran tahay
- Waa in la kululeeyaa inta aan lagu siin.

2. Waxyaabaha laga sameeyay waa inay xalaal ahaadaan

Taas macnaheedu waxay tahay:



- In **maaddooyinka cuntadaas laga sameeyay ay Xalaal yihiin**
- Cuntada waxaa lagu sameeyaa jikada **QEII**
Fiiro gaar ah: Jikada ma aha mid haysata shahaado Xalaal ah
- Cuntada waxaa lagu kululeyn karaa ama lagu siin karaa **meel u dhow cuntooyinka aan Xalaasha ahayn.**

Ma hubtid midka aad dooranaysa?



- Weydii kalkaaliso caafimaad ama shaqaale nafaqo.
- Waxay kaa caawin karaan inaad doorato wixii kugu haboon.

Sida loo dalbado cuntada



Si aad cunto u dalbato, waxaad u baahan doontaa:

- **Magacaaga**
- Aqoonsigaaga **Bukaanka**
Fiiro gaar ah: Kani waa lambarkaaga UR ama MRN ee ku yaal suunka gacanta ee isbitaalkaaga
- Taariikhda **dhalashadaada**.

Fursada 1-aad - Barnaamijka Bukaanka (CBORD)



- Waxaad ka dalban kartaa dhammaan cuntooyinka **shahaadada Xalaasha ah** ee abka.
- Iskaan garee koodka QR si aad u soo dejiso **Barnaamijka Bukaanka ee CBORD** taleefankaaga ama aaladdaada.
- Abku wuxuu kaliya soo bandhigi doonaa cuntooyinka u dhigma **Cuntadaada Xalaasha ah** .



Ikhtiyaarka 2 - Xarunta Wicitaanka



- Taleefankaaga ku wac **3845 7770** .
- Ama wac **7770** taleefanka isbitaalka, haddii aadan haysan taleefan.

Waad dalban kartaa:

- Dhammaan cuntooyinka **la xaqiijiyay ee Xalaasha ah**
- Cuntooyinka kulul **ee xalaasha ah** , macmacaanka, cabitaannada iyo cuntooyinka fudud.

Ikhtiyaarka 3 - La hadal kalkaaliye caafimaad ama shaqaale nafaqo



La hadal kalkaalisada caafimaadka ama shaqaalaha nafaqada haddii aad u baahato
caawimaad si aad u dalbato cuntooyinkaaga.

Macluumaad dheeraad ah

Booq bogga internetka si aad u hesho ilo dheeraad ah oo ku saabsan Barnaamijka Bukaanka ee CBORD, booqo www.metrosouth.health.qld.gov.au/patients-and-visitors/staying-in-hospital/order-meals-with-a-patient-app